




Sidda Ioo Codsado Martabadda Ilaalinta ku meel Gaarka ah

(How to Apply for Temporary
Protected Status)



Qaar badan oo ka mid ah foomamka USCIS waa ay isbedelayaan iminka! Ka eeg shabakada ([USCIS website](https://uscis.gov)) si aad u hubiso in aad isticmaalayso foomkii ugu dambeeyey ka hor inta aadan waxba u dirin. Haddii aad u dirto foom khalad ah waxaa dhici karta inaad wax walba dib u bilowdo!

Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa sharciga mudadda gaaban ah ee laanta socdaalku (immigration) ay bixiso ee la yiraa martabadda ku meelgaarka ah. Marmarka qaarkood waxaa loogu yeeraa TPS. Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay kuu sheegaysaa:

- Cidda codsan karta martabadda ilaalinta ku meelgaarka ah.
- Waxa aad sameyn karto haddii aad hesho martabada ku meelgaarka ah.
- Talaabooyinka lagu dalbado martabadda ilaalinta ku meelgaarka ah.

Si aad u akhrido warqadan xoga aruursan ah oo Ingiriis ah ama Afaf kale ah, booq o: <https://www.lawhelpmn.org/>.



Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay'adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waxaana gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).

Ciddee ayaa heli karta sharciga la yiraa martabadda ilaalinta ku meelgaarka ah

Waa maxay martabada ilaalinta ku meelgaarka ahi?

Waa sharci muddo yar ah oo laanta socdaalku bixiso. Waa aad codsan kartaa haddii dowladda Mareykanku (U.S.) ay qabto inay khatar tahay in dadka wadankaaga ka soo jeedaa ay ku noqdaan wadankooda. Khatarta waxaa dhici karta inay tahay masiibo dabiici ah, colaad, ama rabshado. Dowladda Mareykanku (U.S.) waxa ay haysaa liiska dhamaan wadamadda dadkoodu xaqqa u leeyahay martabadda ilaalinta ah ku meelgaarka ah. Liiska waxaa laga heli karaa shabakadda hay'adda USCIS ee ah: uscis.gov/humanitarian/temporary-protected-status Wadamadda liiskan ku jiraa waa ay isbedelaan.

Haddii aad rabo martabadda ilaalinta ah ee ku meelgaarka ah, waa khasab inaad codsato.

iskama aad helaysid waayo wadankaaga ayaa ku jira liiska. Dadka haysta martabada ilaalinta ee ku meelgaarka ahi waxa ay si sharci ah ugu noolaan ugana shaqeysan karaan Mareykanka (U.S.) ilaa inta ay dowladdu Mareykanku (U.S.) ay is leedahay waa amaan in dadku ku noqdaan wadankooda ay u dhasheen.

Martabadda ilaalinta ku meelgaarka ahi MA siiso qofka sharci deganaansho rasmi ah. Laakiin waxaa dhici karta inaad cusboobaysiiso martabadaada ilaalinta ee ku meelgaarka ah haddii wadankaagu uu ku sii jiro liiska. La tasho qareen sharciga laanta socdaalka yaqaan haddii aad doonayso inaad sii joogto wadanka United States.

Xaq ma u leeyahay martabadda ilaalinta ah ee ku meelgaarka ah?

Waxaa jira 4 waxyaabood oo aad u baahan tahay inaad lahaato si aad u codsato martabadda ilaalinta ku meelgaarka ah. Waa khasab:

1. **Inaad u dhalatay wadan Mareykanku (U.S.) uu geliyey liiska wadamada xaqqa u leh martabadda ilaalinta ee ku meelgaarka ah.** Taa macnaheedu waa dowladda Mareykanka (U.S.) ayaa go'aansatay inaysan amaan ahayn in dadka lagu celiyo wadankaa. Kolka aad codsato, waxa aad u baahan tahay inaad haysato dukumiintiyada cadeynaya muwaadimadaada. Haddii aad muwaadin ka tahay labo wadan, la tasho qareen sharciyada laanta socdaalka yaqaan ka hor codsashada martabadda ilaalinta ee ku meelgaarka ah.
2. **Aad xaadir ku ahayd wadanka United States kolka wadankaaga la geliyey liiska.** Tan waxaa la yiraa "xaadir ahaanta." Siddoo kale waa khasab inaad deegaan aad degan tahay aad ku leedahay wadanka (U.S.) waqtiga markaa qoran. Tani waxaa la yiraa "xaadir ahaanta sii jirta." Haddii aad u safartay dibada wadanka Mareykanka (U.S.)

qiyaastii xilliga waqtiyada xaq u yeeladka, la tasho qareen sharciyada laanta socdaalka yaqaan ka hor codsashada martabadda ilaalinta ee ku meelgaarka ah.

3. **Codso ka hor xiliga kama dambaysta ah ee codsiga la soo xareynayo.** Waxaa jirta muddo gaaban oo ah kolka ay dowladda Mareykanku (U.S.) aqbalayso codsiyadda martabada ilaalinta ku meelgaarka ah. Waxa ay uga dhawaaqaan mudadda kama dambaysta ah ee codsiyada la soo xareynayo shabakada(website) USCIS ee ah: uscis.gov/humanitarian/temporary-protected-status Waa khasab inaad codsato ka hor mudadda la qabtay. Haddii aad gaftay mudadda kama dambaysta ah ee xaraysiga, la tasho qareen sharciyada laanta socdaalka yaqaan ka hor codsashada martabadda ilaalinta ee ku meelgaarka ah.
4. **Aadan waligaa wax dambi ah gelin.** Ma lahaan kartid waxa ka badan labo dambi oo kuwa darajada hoose ah (misdemeanors) oo lagugu helay. Xatooyadda yar ama kaxeyn gaari aan caymis ku jirin waa dambiyo darajo hoose ah (misdemeanors). La tasho qareen sharciyada laanta socdaalka yaqaan ka hor inta aadan qiran wax dambi ah, aadan ogolaan heshiis aad la gelayso bilayska ama qareen ama aadan bixin ganaax. Haddii lagugu helay wax dambi ah, la tasho qareen yaqaan sharciyada laanta socdaalka ka hor inta aadan codsan martabadda ilaalinta ee ku meelgaarka ah.

Haddii aan helo martabada ilaalinta ah ee ku meelgaarka ah, muddo intee le'eg ayey socon?

Waxay ku xiran tahay xaaladda. Kaliya waxa aad xaq u leedahay martabada ilaalinta ah ee ku meelgaarka ah inta wadankaagu uu ku jiro liiska. Wadan waxa uu ku jiri karaa liiska muddo gaaban ama mudoo dheer. Haddii ay ka dhacday masiibo dabiici ahi wadan, waxaa dhici karta in wadankaasi uu liiska ku jiro 3 bilood. Haddii wadan uu ka jiro dagaal dabadheer, waxaa dhici karta in wadankaagi uu liiska ku jiro sannado badan. Waa inaad cusboonaysiisaa martabadaada mar walba oo wadankaaga dib-loogu-darro liiska.



Tusaale: Sofia waxay uga soo tagtay Ukraine dagaalka awgii

Wadanka Ukraine waxaa lagu daray liiska wadamadda xaqqa u leh martabada ilaalinta ku meelgaarka ah (TPS) laga bilaabo bishii Abriil 2022 ilaa iyo Oktoober 2023 dagaalka awgii. Sofia waxay ku dhalatay Ukraine. Waa ay ka soo tagtay wadankeedii waxa ayna timid Minnesota bishii Janaayo 2023. Sofia waxa ay codsatay TPS. Waana loo ogolaaday martabada TPS ilaa iyo bisha Oktoober 2023. Bishii Oktoober 2023, dowladda Mareykanku (U.S.) waxay kordhisay meesha ay kaga jirtay liiska Ukraine waxaana la gaarsiiyey ilaa iyo bisha Abriil 2025. Sofia waa inay dib u codsataa TPS iyo warqada shaqada si ay sii haysato martabadeeda.

Wadamadee ayee ku jira liiska martabada ilaalinta ee ku meelgaarka ah?

Liisku waa uu isbedbedalaa. Si aad u ogaatid in wadankaagu liiska ku jiro:

1. Gal shabakada (website) USCIS: uscis.gov/humanitarian/temporary-protected-status
2. Riix “Wadamada Iminka Loo Aqoonsado Liiska TPS” “Countries Currently Designated for TPS” si aad u aragto liiska.”

Haddii aad haysato martabadda ilaalinta ah ee ku meelgaarka ah, eeg shabakada (website) maalin walba si aad u eegto in dowladda Mareykanku (U.S.) ay kordhinayso waqtiga wadankaagu uu ku sii jirayo liiska. Bilow inaad eegto 3 bilood ka hor xilliga martabadaada ilaalintu ah dhacayso.

Waa goorma marka ugu dambaysa ee la codsanayo martabada ilaalinta ku meelgaarka ah?

Codsigan marka ay mudadiisa soo xareyntu ay xirmaysaa waa u gooni wadan walba. **Haddii aad gafto mudadda soo xareynta, la tasho qareen yaqaana sharciyadda laanta socdaalka.** Si aad u ogaato marka ay soo xareynta codsigu xirmayso:

1. Gal shabakada (website) USCIS: uscis.gov/humanitarian/temporary-protected-status
2. Riix “Wadamada Iminka Loo Aqoonsado Liiska TPS” “Countries Currently Designated for TPS” si aad u aragto liiska.
3. Dooro wadankaaga. “Mudada Isdiiwaangelintu” waa mudada soo xareynta ugu dambaysa haddii aad cusboonaysiinayso TPS kaaga.

Jaantuskani waxa uu tilmaamaa taariikho kala duwan iyo mudooyinka kama dambaysta ah ee martabadda ku meelgaarka ah. Waxa uu sharxaa waxa mid walba macnihiisu uu yahay.

Nooca	Waxa macnaheedu yahay
TPS Designated Through: (TPS Waxaa la Aqoonsaday ilaa)	Maalinta TPS ku uu u dhamaado dadka wadankan. Tani waxa ay quseeysaa dadka codsanaya markii ugu horeeysay iyo dadka cusboonaysiinaya TPS kooda.
Mudadda Dib-isu-Diiwaangelinta:	Maalinta ay khasabka tahay inaad cusboonaysiiso TPS kaaga. Wadan walba ma lahaan doono maalintan. Tan waxaa leh dadka jaa horey u lahaa TPS ka.
Mudadda isdiiwaangelinta:	Maalinta ay khasabka tahay inaad codsato TPS haddii aad codsanyo markii ugu horeeysay.
Dukumiintiga Warqadda Shaqada (EAD) Waxa uu Iskii u kordhaa ilaa iyo:	Haddii iminka aad haysato warqad shaqo, tani waa waqtiga ay shaqeynayso warqaddu. Waa inaad cusboonaysiiso warqadaada shaqada kolka aad cusboonaysiinayso TPS kaaga. Laakiin waa aad sii shaqeyn kartaa inta hawsha codsigaagu socoto. Tani waxay quseeysaa jaa dadka horey u leh TPS.

Sii waday degaanta United States ilaa:	Waa khasab inaad ku noolayd wadanka United States ilaa iyo maalintaa si aad u codsato. Uma aad guuri kartid wadan kale ka dibna dib uma soo noqon kartid. Tani waxa ay quseeysaa dadka codsanaya markii ugu horeeysay <u>iyo</u> dadka cusboonaysiinaya TPS kooda.
Xaadir ku ahaanta wadanka United States ilaa:	Kaliya waxa aad u socdaali kartaa dibada wadanka United State ka safaro ‘gaaban, aan qasdi lahayn, iskana macno la’aan ah’ ilaa waqtigan. Tani waxa ay quseeysaa codsanaya markii ugu horeeysay <u>iyo</u> dadka cusboonaysiinaya TPS kooda. Haddii aad dibada uga baxday wadanka (U.S.) wixii ka dambeeyey waqtigan, la tasho qareen sharciyada laanta socdaalka yaqaan ka hor codsiga martabada ilaalinta ku meelgagarka ah.
Taariikhda la Aqoonsaday TPS:	Wagtiga Dowladda Mareykanku (U.S.) ay markii ugu horeeyey ku dartay wadankan liiska TPS. Tani waxa ay quseeysaa codsanaya markii ugu horeeysay <u>iyo</u> dadka cusboonaysiinaya TPS kooda.
Wagtiga Iminka ee Aqoonsiga TPS ka:	Wagtiga Dowladda Mareykanku (U.S.) ay ka saartay wadankan liiska TPS ka. Wadan walbaa ma lahaan doono waqtigan. Tani waxa ay quseeysaa codsanaya markii ugu horeeysay <u>iyo</u> dadka cusboonaysiinaya TPS kooda.

Ma shaqeyn karaa haddii aan leeyahay martabadda ilaalinta ah ee ku meelgaarka ah?

Haa, **HADDII** aad dalbatay warqad shaqo. Iskama helaysid ogolaansho aad ku shaqeyso haddii aad leedahay martabadda ilaalinta ee ku meelgaarka ah. Waa khasab inaad dalbato warqad shaqo isla markaa aad codsanayso martabadda ilaalinta ku meelgaarka ah. Waxaa jira tilmaamo ku saabsan dalbashada warqad shaqada oo ku jira qaybta “Talaabooyinka lagu Codsado” ee warqadda xogta aruursan ah. Haddii aad u baahan tahay inaad cusboonaysiiso martabadaada ilaalinta ah ee ku meelgaarka ah, waa inaad iyana cusboonaysiiso warqadaadda shaqada isla markaa. Sii wado shaqada inta codsigaaga laga eegayo.

Ma inaad la tashadaa qareen sharciyada laanta socdaalka yaqaan?

Waa aad codsan kartaa martabada ilaalinta ku meelgaarka ah adigoo qareen la hadlin. Waa ra’yi fiican inaad la tashato qareen ka hor inta aadan codsan haddii:

- Aad ka haysto muwaadinimo labo wadan. Tusaale ahaan: Waxaad tahay muwaadin Soomaali ah laakiin ku dhashay wadanka Itoobiya.
- Aad gaftay waqtigii soo xareynta codsiga.
- Lagugu helay wax dambi ah.
- Lagu waydiistay inaad qirato dambi ama aad bixiso ganaax.
- Aad u safartay dibada wadanka Mareykanka (U.S.) abaarihii ama xilligii xaq u yeeladka.

- Aad rabto inaad ugu noolaato ama uga shaqeysato wadanka United States si rasmi ah.
- Aad qabto su'aalo ku saabsan xaq u yeeladkaaga martabada ilaalinta ku meelgaarka ah.

Maxaa dhaca haddii wadankayga laga saaro liiska wadamada ku jira martabada sharciga ah ee TPS?

Haddii wadankaaga ay ka saaraan liiska wadamada leh sharciga ku meelgaarka ah ee TPS ka ([list of countries that have TPS](#)), degdeg ula tasho qareen! Waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato inaad hesho noocyo kale oo sharci ah. Qareenku waxa uu kaala hadli karaa waxyaabaha aad kala dooran karto. Qareenkaagu siddoo kale waxa uu kuu sheegi karaa haddii ay jirto wax dacwo ah oo dib u dhigta ama joojin karta dhamaadka (TPS) ka ee wadankaaga.

Xaggee ayaan ka heli karaa qareen i caawiya?

Ka baar qareeno lacag la'aan ah iyo rugo dhanka sharciga dadka ka caawiya barta [LawHelpMN.org](#). Qareemada lacag la'aanta ah aad yaa loo rabaa. Lagaama balan qaadi karo qareen lacag la'aan ah in lagu helo codsigaaga awgii uun. Siddoo kale waa aad la hadli kartaa qareen iskii u shaqeysta haddii aad awoodo inaad bixiso \$200 ee kulanka koowaad.



Talaabooyinka Lagu Codsado

Siddee ayaan ku codsan karaa martabada ilaalinta ku meelgaarka ah?

Waxaa jira 4 talaabo oo lagu codsan martabada ilaalinta ku meelgaarka ah.

Talaabada 1: Buuxi Foomka I-821 (Form I-821).

Gal [uscis.gov/i-821](#) ama mari kooda QR si aad u hesho foomkan. Ku taab garee jawaabahaaga ama ku qor qalin khad madow ah. Qor jawaabahaaga iyagoo afka-Ingiriiska ah.



Talaabada 2: Soo aruuri dukumiintiyada si aad ula dirto codsiga.

Waa khasab inaad dirto dukumiintiyada cadeeya inaad xaq u leedahay martabada ilaalinta ku meelgaarka ah. **Sababaha inta badan loo diido codsiyaddu waa dadku ma diraan cadeyn.** La dir 7 waxyaabood codsigaaga ilaalinta ku meelgaarka ah:

- ☐ **Foomka I-821 oo buuxsan (Form I-821).**
- ☐ **Nuqul ah 1 dukumiinti oo cadeynaya qof aad tahay.** Dukumiintigu waa khasab inuu bixiyey United States ama wadan kale dowladdii. Haddii dukumiintigu uusan ahayn afka-

Ingiriiska, waa khasab inaad turjunto. Tusaale ahaan, dukumiintiyada la qabali karo waxaa ku jira:

- Dal-ku-gal (passport) leh sawirkaaga, magaca, iyo taariikhdaada dhalashada;
- Warqad dhalasho oo leh sawir aqoonsi ah(ID);
- Fiise (visa) ay bixisay qunsiliyad ajnabi ah;
- Warqad shaqo oo hore hadii aad cusboonaysiino codsigaaga; **AMA**
- Dukumiinti aqoonsi (ID) oo qaran oo leh sawirkaaga.

☐ **Nuqul ah 1 dukumiinti oo cadeynaya inaad u dhalay wadan ku jira liiska wadamada la siiyo martabada ilaalinta ee ku meelgaarka ah.**

Tusaalooyinka dukumiintiyada la aqbali karo waa:

- Dal-ku-gal (passport) leh sawirkaaga, magaca,iyo taariikhda dhalashada; **AMA**
- Warqad dhalasho oo sawir aqoonsi (ID) ah.

☐ **Nuqulo 1 ilaa 3 dukumiinti oo sheegaya inaad ku nooshahay wadanka United States.**

Waxa aad soo diri kartaa 1 dukumiinti hadii dhamaan waxa aad haystaa ay intaa yihiin.

Waxaa roon inaad soo dirto 3. Tusaalayaasha dukummintiyadda la aqbali karo waxaa ku jira:

- Heshiiska (lease) guryaha lagu dago;
- Dukumiintiyada deynta guryaha (mortgage);
- Qoraaladda caafimaad;
- Qoraaladda iskuulka ee adiga ama ilmahaaga (magacaagu waa khasab inuu ku qornaado qoraalada);
- Qoraaladda shaqada;
- Warqado ay kuu soo qoraan daris, culumo, shaqo tabarucaad ah;
- Rashiid ah wax aad ka gadatay Mareykanka (U.S.);
- Qoraal lacag aad dirtay ah;
- Qoraalo telefan;
- Warqado ciwaan Mareykan (U.S.) kuugu soo dhacay; **AMA**
- Sawiro, hadii shaabad waqtigii la qaaday ah ay leeyihiin laguna qaaday United States.

☐ **Foomka I-765 oo dhamaystiran (Form I-765 (Kaliya HADDII aad rabto inaad codsato warqad shaqo.)** Dadka haysta martabada ilaalinta ku meelgaarka ah waa loo ogol yahay inay shaqeeyaan, laakiin waa khasab inay codsadaan warqad shaqo. Buuxi Foomka I-765 (Form I-765). Waxa uu ku jiraa barta: uscis.gov/i-765. Waa khasab in la soo dirto Foomka I-765 codsigaaga martabada ilaalinta ku meel gaarka ah. **HA soo kala dirin.** Barta LawHelpMN waxa ku jira xog aruursan oo ka hadasha sidda loo codsado warqada

shaqada. Gal barta: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/how-get-permission-work-minnesota

- **Labo sawir oo isku mid ah 2" x 2" oo ah kuwa dal-ku-gal ah (passport) ayaa la rabaa (HADDII aad codsanayso warqad shaqo).** Waxa aad ka geli kartaa sawiradda dal-ku-galka dukaamada sida CVS, Wal-Mart, ama Walgreens.
- **Khidmada AMA codsiga saamixida khidmada.** Dir lacagta idman ama jeeg. Lacagta idmani waa sidida ugu fiican ee lagu bixiyo. Khidmadaha bilaabo Janaayo 2025 hoos ayaa lagu xusay. Khidmadahu waa ay isbedeli karaan. Ka hor inta aadan codsigaaga dirin, eeg shabakada ([USCIS website](http://uscis.gov)) si aad u hubiso inaad dirto khidmadda saxda ah.
 - **Haddii aad codsanayso martabada ilaalinta ku meelgaarka ah markii horeeysay:** Waxaa jirta \$50 khadmad ah oo lagu dalbado iyo \$30 oo khidmada baayomatriga ah (biometrics). HADDII siddoo kale aad codsanayso warqad shaqo, waxaa jirta khidmad ah \$520 oo kale oo iyana la bixiyo.
 - **Haddii aad codsanayso inaad cusboonaysiiso martabadaada ilaalinta ee ku meelgaarka ah:** Waxaa jira khidmad \$30 ah baayomatriga ah (biometrics). HADDII siddoo kale aad codsanayso warqad shaqo, waxaa jirta khidmad ah \$520 oo kale oo iyana la bixiyo.
 - **Haddii aadan awoodin inaad bixiso khidmada, codso khidmad saamixid.** Isticmaal isla foomka [I-912 form](http://uscis.gov/i-912) si aad u codsato ka saamixidaha khidmadda labadaba sharciga ilaalinta ku meelgaarka ah iyo tan warqadda shaqadda. Shabakada (website) LawHelpMN waxa ay haysaa xog aruursan oo ku saabsan khidmad saamixida. Gal barta: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/immigration-fee-waivers-uscis

Talaabada 3: Nuqul ka samee codsigaaga.

Ka samee nuqul Foomkaaga I-821 (Form I-821) iyo dukumiintiyadda codsiga. Adiguna nuqul kala har.

Talaabada 4: U dir codsigaaga Hay'adda Adeegyada Muwaadinka iyo laanta socdaalka ee U.S. [Citizenship and Immigration Services (USCIS)].

- Ku hagaaji codsigaaga ciwaanka waafaqsan wadankaaga. Gal barta: <https://www.uscis.gov/humanitarian/temporary-protected-status>
Riix “Wadamada Iminka Loo Aqoonsado Liiska TPS” “(Countries Currently Designated for TPS.)” Doorro wadankaaga si aad u hesho ciwaanka boostada.
- Gado la socod kolka aad boostada ku dirayso codsigaaga. Hubi inaad hesho cadeyn ama rashiid ah in lagula soo socodsiiyo kolka la geeyo meeshii aad u dirtay warqadda.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.